Buulkii Jacaylka

Maxamed Cabdullaahi Jaamac

Waxay ahaayeen ardo dhiganeysa fasalkii u dambeeyey ee dugsiga sare, markii laga soo dareeray dugsiga ayaa laba gabdhood muran ka dib uu dagaal dhexmaray, wiilashii oo Yuusuf ku jiro ayaa kala jiiday, wuxu dhankii xaafaddeeda u soo raacay Batuulo oo ka mid ahayd labadii gabdhood oo ay dirirtu dhex martay.

Yuusuf oo ahaa nin dherer xigeen ah dhuuban oo madow, dabci furfuran leh oo uu jaal kula yahay badi ardada.Intii ay socodka ku jireen ayuu isku dayey in uu Batuulo ka waaniyo dagaalka in aan waxba laga kororsan, oo dadka dagaalamaya ay yihiin dad aan weli bislaan ama aan qaangaarin oo weli carruur ah, oo dadka waaweyni af-ka-hadal ku dhammeystaan arrimahooda. Batuulaa waxay tiri:

-Waa runtaa walaal, oo raggu markey yiraahdeen "Dumarku waa carruur caga waa weyn" ayaa maanta run noqotay!
-Maahmaahdaa iyo kuwa kaleba waa kuwo raggu sameeyeen oo ay ku liidayaan garashada haweenka, fasalkeenna adaa noogu dhibco sarreeya ee yaa kaa garaad badan? Tan kale ma ku weydiin karaa adiga iyo Dahabo maxaa idin dhexmaray?
Inta ay Batuulo qososhay ayey waxay tiri:
-Waxa aan isku maandhaafnay waxay la mid tahay sheeko-carruureed aan dugsiga hoose ku soo qaadanay, oo ka sheekeyneysay laba nin oo magaalo u socda, oo midkood weydiiyey kii kale: Haddii Ilaahay baryadaada kuu oggolaado maxaad Alle ka baryi lahayd? wuxu yiri:
-Waxan Alle ka baryi lahaa in uu i siiyo dhawr tiro oo ari ah, ee adigu maxaad weydiisan lahayd?
Kii kalaa yiri: Waxan Alle weydiisan lahaa in uu i siiyo dhawr tiro oo dhurwaaya ah oo cuna arigaaga!
Halkaas ayaa gacan-ka-hadal ka bilowday, ilaa ay nabarro is gaarsiiyeeyn, oo inta kala daaleen midba dhinac u dhacay. Goobtii ayaa waxa soo maray nin kale oo dameer wata oo dhawr teneg oo malab ah u saaran yihiin. Ninkii markuu arkay nimankaan daqarrada ku yaal iyo xaalkooda ayuu wuxu weydiiyey waxa dhacay, markey u sheegeen ayuu tenegyadii dameerka u saarnaa mid soo qaaday oo malabkii dhulka ku daadiyey, wuxuuna yiri: Ilaahay ha ka dhigo dhiiggayga sida malabkaas, labadiinuba doqommo ayaa tihiin!
Isma ogeyne asaguna doqonkii saddexaad ayuu ahaa markuu malabkiisa iska daadiyey.

Hadda waxa na dhexmaray waxay la mid ahayd wax aanan labadayaduba haysan oo hebel anuu ila socda iyo kulama socdee anuu ila socda iyo muxuu kugu falayaa adiga sidaan ah iyo adiga sidaan ah ilaa caydii ay waalidkii gaartay, Allow ceeb astur.

Yuusuf baa yiri: Waa sheeko yaab leh, ma se ku weydiin karaa hebelkaas ayaanka badan ee aad isku dirirteen?

Batuulaa tiri:
Magac-dhabiddiisu waxba ma kordhineyso waa wiil-door wiilashiisa ku dhexjira.

Maalintaas ka dib marka dugsiga laga soo baxo wuxu u sii dhoweyn jiray Batuulo dhanka gurigeeda. Aad bey sheekadu isugu bixi jirtay, kuwaas oo ah kuwo guud, ilaa maalin ay Batuulo tiri:

- Haddii Ilaahay shimbir iga dhigi lahaa markaan qaangaaraba aniga iyo jacaylkaygu waxan dhisan lahayn buulkayaga jacaylka, keligaya ayaa ku noolaan lahaa oo jacaylkayagaan koolkoolin lahayn, halkaas ayaana haddii Alle carruur na siiyo ku korsan lahayn, waxan kaloo jeclaan lahaa dhul-badeed yar in aan aniga iyo jacaylkaygu ku noolaano oo aan cidina na arbushin, sow kulama fiicna sidaas Yuusufow?
-Waa runtaa laakiin Ilaahay shimbiro ina kama dhigo. dadkana ina kama dhexsaaro. Qosolna
ku daray.
Yuusuf baa isla weydiintii uu malin hore weydiiyey hore si kale u dhigay oo yiri:
-Ma ii sheegi kartaa tilmaamaha wiilka ah riyada jacaylkaaga ?
Batuulo waxay tilmaantay wiil Yuusuf tilmaamihiisa leh, Yuusuf baa yaabay oo yiri waa mid aanu isku dhow nahay kaasi! Batuula ayaa tiri iyadoo qosleysa:
-Mid kale ma aha, ee wiilka riyadaydu waa adiga, wiilkii aan aniga iyo Dahabo isku dirirnayna waa adiga!
Yuusuf baa inta Socodkii joojiyey oo u dhugtay Batuulo sidii ay markii u horreysay oo uu arkayo ay tahay kuna yiri:
-Batuulo u kaadi, anigu waxan ahay sida walaalkaa oo kale oo aad igu kalsoon tahay in aan wax dhib ah dhankayga kaaga imaaneyn, waxad se tahay sida uu nebigeenu inoo sheegay NNKH “Naagaha waxa loo guursadaa afar: xoolo ay leedahay, quruxdeeda, nasabnimadeeda iyo diinteeda, ku guuleysta in aad kala baxdaan tan diinta leh”. Afartaa tilmaamoodba waa leedahay iyo garasho dheeraad ah, waxa tahay riyada wiil kasta lammaanihii uu nolosha la wadaagi lahaa.
-Mahadsanid ammaantaas, haddey saas tahay sow ma bilaabi karno in aan dhisanno buulkeenna jacaylka?!
-Muddadii aan ku aqiin marna xiriir saas ah inaan kula yeesho talada kuma darin, sababta aan uga fogaanayeyna waa dhaqan ay beelaha Soomaalida qaarkood lee yihiin, oo aaney jecleyn isdhexgalka beelaha kale, ha ahaato islaweyni ay quursanayaan kuwa kale ama iyagoo ilaalinaya isirkooda gaarka ah, oo ka baqaya haddey beelaha kale isdhexgalaan in ay ku milmaan oo raadkooda ba la waayo, adna Batuulow beelahaas ayaad ka mid tahay, marka dhinaca kula qabto dhismaha buulkaas, adna dhib badan ayaad la kulmeysaa, anna riyo been ah ayaan dhex dabbaalan doonaa.

-Garashadaas dheer waa kugu ogaa, waxan ka helay sida aad u lafagutay dhaqankayaga silloon, hase yeeshee wax aan dhib loo marin dhadhan ma leh baa la yiri, sow ma istaahisho in aan isku daynno.
- Nin baa waxa laga sheegay in uu yiri:”Weligay gar la igama helin” markaas ayaa la weydiiyey sababta, wuxu yiri: “Inta aanan geedka tegin ayaan soo garnaqsadaa”, waxad lee dihiin dhaqan soojireen ah oo ilmaha markuu dhashaba la bixiyo, oo la isa siiyo ilama-abti, ilma- eeddo, ilmo-habaryar iyo ilma-adeer, Waxan ka yaabsanahay maxaa

adiga guur la'aan ku soo gaarsiiyey da'daan idinka oo afar iyo tobanjir ku guursada, haddaanan gafsaneyn sow adiga laguma bixin adoo yar?
Batuulo oo niyad jabsan baa tiri:
-Waa runtaa anoo laba sano jira ayaa la i siiyey ina-eeddaday Amiin, laakiin wax aqoon ah isuma lihin, wax sheeka ah oo na dhexmartayna ma jiraan, habdhaqankiisa oo dhanna kama helin, mooradaas aad u oodan ayaan rabay in aan ku gedoodo haddii aan helo geesi ila dhabar adeyga.

Iyagoo aan is ogeyn ayey gurigii Batuulo albaabkeedii so gaareen. Waxay ku ballameen in berri sheekada hakaas ka sii wadaan, haddii Ale idmo.

Batuulo waxay u soo jeedisay in ay Cagaaran tagaan oo isku soo mehersadaan, ka dib na ay sheekadu halkaas ku soo afjaranto. Yuusuf oo ku dhaygagsan wajiga Batuulo, laakiin meel ka fog iyada eegaya ayaa Batuulo gacanteeda wajigiisa ugu ruxday sidii babbiskii iyadoo weydiineysa:

- Ma ila joogtaa ma se meel kalaa ku mqan tahay?
Maahsanaantii markii uu ka soo baraarugay ayuu wuxu yiri:
-Adduunyo kale ayaan ku maqnaa, waxan mala awaashay innagoo isla baxsannay oo inta habaar waalid ina ku dhacay aan dhalnay carruur wada jirran mid indha la', mid dhega la', Ilaahay naguma keeno e, habaar waalid uma barbardhigi karno.
-Mala-awaalkagu waa mid aan waxba ka jirin, habaar waalid wuxu ku qabanayaa marka aad ka gardaran tahay waalidkaaga, laakiin marka ay waalidku kaa gardaran yihiin, waxba kuma yeelayo ee baydadka jooji.

Iyagoo aan waxba go'aan isla gaarin ayaa dugsigii dhammaaday, Xaaji Cabdulqaadir oo Batuulo aabbeheed ahaa ayaa u soo jeediyey Batuulo in ay tahay waqtigii aqalgalkeeda oo arooskeedii iyada iyo Ammiin la abaabulayo. Sidii markii hore ba ay uga badbaadday guurkii dhawr iyo toban jirka ayey ka codsatay aabbaheed iyadoo aan waxba diideyn in ay waxbarasha sare ku biirto, hase yeeshee markaan waa u socon weyday oo odagu waa ku gacansayray iyadoo dhanka walashiis Ammiin dhashay laga soo riixayo. Yuusuf waa la socday Batuulo xaalkeeda, laakiin wuxu rumeysnaa in aanu waxba ka qaban karin, Xaaji Cilmi oo adeerkiis ah ayuu ka codsaday in uu ula tago Batuulo aabbaheed oo gabadha uga doono. Waxay ahayd mid uu ku qancinayey Batuulo ee waa ogaa jawaabta odaga. Markii ay u yimaadeen, arrintiina u soo bandhigeen Xaaji Cabdulqaadir waxa uu u sheegay in mar hore la bixiyey Batuulo oo aaney madaxbannaaneyn, sheekadaasina halkaas ku xiran tahay, oo aanuna raali ka ahayn mar dambe in wax xiriir ah oo ka dhexeeya Yuusuf iyo iyo gabadhiisa. Batuulo markey maqashay wixii kulankaas ka soo baxay aad bey u jirratay, jirro aan daawo lahayn oo sariir ayey ku ururtay, muddo markey sidaas ahayd ayaa aabeheed wuxu u qaaday Cisbataal ku yaal Talyaaniga.

Yuusuf waa ka xumaaday jirrada ku dhacday Batuulo, wax se kama qaban karin. Wuxu shaqo ka helay Wakaaladda Muuska Soomaaliyeed, dhawr bil markuu ka shaqaynayey ayaa waxa tababar gaaban loogu diray dalka Talyaaniga asagoo soo baranayey saadka iyo taakuleynta gaadiidka badda, wuxu maqlay in Batuulo caafimaad ahaan loo keenay

Talyaaniga aabbeheedna la socdo, ballantuna waxay ahayd in aanu agteeda marin, laakiin warqad ayuu u qoray uu Alle uga baryayo in uu caafimaad degdeg ah siiyo, oo ugu dhiibay gabar ay dugsiga wada dhigan jireen, Markii ay heshay warqaddii aad bey ugu faraxday, haddana waxay ku hammiday haddaad caafimaad hesho sow lagugu darimaayo Ammiin, waxay doorbideysay in ay weligeed iska xanuunsanaato.

Warqad bey ugu warcelisay ay lee dahay inta aan adi kaa helayo, jirradaas xanunka badan igu haysa ayaan deris la ahaanaya. Markuu tababrkiisa soo dhammeystay Yuusuf dalkii buu ku soo noqday, waxa loo beddelay waaxda gaadiidka badda ee wakaaladda, halkaas oo uu shrikadaha maraakiibta qaboojiyaha leh kala xiriiri jiray sidii muuska loogu rari lahaa. Salma oo Batuulo ka yar ayaa la socodsiin jirtay Yuusuf xaaladdeeda, ka dib markey soo noqotey na caafimaadkeedii waxba iskama beddelin. Burburkii ka dib Yuusuf wuxu qaxooti ku galay dalka Kenya iyo magalada Mamabaasa, wuxu codsi shaqo u qortay sharikadihii maraakiibta ee uu la xiriiri jiray mid ka mid ah oo xarun weyn ku lahayd magaalada, ka dib markey aqoonsadeen in uu ahaa sarkaal ka tirsanaa Wakaaladda Muuska Soomaaliyeed ayey mushahar fiican ku qorteen iyagoo quuddareynaya hadii Soomaaliya nabad noqoto in uu maraakiibtooda shaqo badan siin doono.

Maalin asaga oo baabuur wata ayuu wuxu laamiga dhinaciisa ku arkay Xaaji Cabdulqaadir iyo qoyskiisii oo laamiga dhinaciisa taagan ayaga oo u muuqda in ay reer guuraya yihiin. Baabuurkii ayuu agtooda inta joojiyey salaamay, Batuulo oo weli jirradii hayso oo fadhiday ayaa markey maqashay codkii Yuusuf soo kacday oo ku soo boodday, waxay dhegta ugu sheegtay in muuqiisu uu daawadeeda yahay, xaashi yarna gacanta u gelisay. Waxa ku qornaa tuducyo ka mid ah hees uu tiriyey abwaam maxamad Jaamac Ilkacase: Wahay waanigaa wakinayee Intaan wiiqmay weehanaaboo Wahay waqtigaa i sida baa waxyeellada iigu wacanoo Ubaahaday wareysigaagee Hadmeynu is weheshan doonnaa. Waa naxay wuxu yiraahduu garan waayey, Batuulo ma aha tii uu yiqiin, gibelkeeda iyo muuqeeduba waa isbeddeleen, indheheedii waa weynaa god dheer bey ka soo jeedaan, waa qof muddo maliil ahaa. Xaaji Cabdulqaadir baa gabadhiisii ka codsaday in ay fariisato meesheedii, taana waa yeeshay. Yuusuf baa u soo jeediyey Xaaji Cabdulqaadir in uu guri geeyo inta ay ka helayaan gaadiid ilaa Yaman gaarsiiya oo ahayd halka ay ka soo jeedeen abkood dhawr boqol oo gu’ ka hor.

Xaaji Cabdulqaadir wuxu u sheegay inuu taa ku mahadsan yahay, oo uu sugayo wiil uu adeer u yahay oo uu halkaan kula ballamay. Markuu saas yiri ayaa waxa soo dhexgashay hadalkii hooyo Raxma oo tiri maandhow ninkaan uu sheegayo lama hubo in uu noo imanayo ee adaan ku raaceynaa,. oo reerkii ku tiri ina keena Bas yar ayuu u soo kireeyey, wuxu dejiyey guri weyn, dhammaan waxay u baahnaayeen ayuu u keenay oo ay ku jiraan dad u adeega oo deegaanka ah, wuxuna ku yiri Xaaji Cabdulqaadir, inta aad halkaan joogtaan kharajka idin ku baxa waa dushayda, wixii aad haystaan u kaydsada dhulka aad tegi doonto oo aad socdaal ku tahay qudhiisa. Xaaji Cabdulqaadir oo rumeysan la’ samafalka uu Yuusuf u fidiyey iyo sida uu u xumeeyey markii hore ayaa u mahad naqay Yuusuf. Yuusuf wuxu ka codsaday in uu Batuulo geeyo cisbitaal gaar loo lee yahay oo magaalada ku yaal, Xaaji Cabdulqaadir waa ka oggolaaday, weliba iga raalli ahow haddaan markii hore kuu diiday, hadda haddii ay caafimaaddo

raali baan ka ahay in aan gacanteeda kugu wareejiyo, haddii tii Alle u timaaddana gabadha ka yar baan ku siin. Yuusuf oo aad u faraxsan ayaa Batuulo hooyadeed iyo Salma u qaaday Taqtarkii.

Dhawr gu' cudurkii hayey dhawr toddobaad ayey kaga bogsaty oo caafimaadkeedii oo buuxa iyo quruxdeedii Alle ku manneysatay ayaa u soo noqday. Bil ka dib Yuusuf iyo Batuulo waa aqal galeen reerkeedii oo weli jooga, wuxu ka codsaday aabbeheed in ay halkooda joogaan inta waddankii nabadi ka dhlaneyso, Yaman oo awoowayaashood ka soo jeedaanna aaney waxba u ahayn. Xaajigu waa ka yeelay. Qoyskii cusbaa nolol is afgarad iyo liibaan leh ayey wada heleen, hubaal liibaantaasi waxay faalali lahayd haddii Soomaaliya oo nabad ah qoysku ku noqon lahaa.

W/Q: Maxamed Cabdullaahi Jaamac
Email: mohamedajama@live.com